Ka badbaadi gabadhaada
Xanuunka iyo taaha
Gudniinka

Bespaar uw dochter
de pijn
van besnijdenis

Ka badbaadi gabadhaada

Xanuunka iyo taaha Gudniinka

BTUSMADA BUUGGA

Arar

Hordhac

Noocyada gudniink

Dhibaatooyinka caaflmaad ee gudniinka

Sheeko ku saabsan gudniin gabar Soomaaliyeed

Sababaha gudniinka

Yaa go'aamiya gudniinka gabadha?

Aragtida Islaamka ee gudniinka dumarka

Mowqifka dawladda Nederland iyo WHO ee gudniinka dumarka

Gabogabo

Arar

Ururka kulmiya ururrada Soomaaliyeed ee lagu magacaabo FSAN waxaa hawlihiisa kala duwan ka mid ah mashruuca ka hortagga gudniinka dumarka. Mashruucu wuxuu bilowday bishii April 1996, ujeedadiisuna waxaa weeye: in wixii war iyo macluumaad ah oo la xiriira dhibaatooyinka caafimaad ee gudniinka dumarku keeno la gaarsiiyo bulshada Soomaaliyeed oo ku nool Netherland. Qof kasta oo Soomaali ah waa garanayaa in gudniinku uu yahay caado da'weyn oo laga isticmaalo Soomaaliya. Weliba dad badan ayaa aaminsan in loo sameeyo arrin diiniyan ah awgeed,in kastoo qur' aanka kariimka ah aan lagu sheegin erayga khitaan oo ah "Gudniin".

Si kastaba ha ahaatee,maadaama ayna badnayn ama jirinba buug arrintan gudniinka ka hadlaya kuna qoran af Soomaali,lagana helayn dalkani ayey lagama maarmaan noqotay in bulshadeena loo diyaariyo buug yarahan. Buuggani waxaan ku soo qaatay waxyaabaha ugu muhiimsan ee gudniinka dumarka ku saabsan.

Waxaan halkan ugu mahad celinayaa dadkii akhriyey buug- yarahan taladana ka bixiyey habka qoristiisa iyo sixitaanka afko Soomaaligaba oo ay ka mid yihiin: M. Shirdoon, Sirad Aaden, Yaasiin M. Nuur, Mohamed. Y. Abdillaam,A.M.Maalim, M.Farah Siad. Waxaan kale u mahadnaqayaa Sheekh Maxamuud Shible talooyinkii wax ku ooIka lahaa ee uu iga siiyay dhinaca aragtida
Islaamka ee gudniinka dumarka. Waxaan kale oo aan u mahad celinayaa Paul Boersma oo iga caawiyey sixitaanka af Netherlandka, iyo wasaaradda caafimaadka,daryeelka iyo Isboortiga (WVS) oo kabtay kharashka mashruuca.

Zahra Siad Naleie
Amsterdam, Febraayo 1997
Isuduwaha mashruuca ka hortagga gudniinka dumarka ee FSAN

Hordhac

Gudniinka dumarka waa caado soo jirtay qarniyaal,haddana weli looga dhaqmo waddamo badan oo Afrikaan iyo qaar ka mid ah Aasiya. Inkastoo lagu kala duwan yahay noocyada guddiinka ee la isticmaalo haddana kan ugu khatarsan uguna waxyeello badan waxaa lagu
magacaabaa qodbidd ama Fircooni. Waddamada aad looga isticmaalo fircooniga waxaa ka mid ah
Itoobiya,Soomaaliya,]ibuuti,Suudaan iyo Maali.

Soomaaliya wixii ka danbeeyey 1980 kii waxa la sameeyey qoraallo iyo cilmibaaris la xiriira dhibaatooyinka gudniinka dumarka. Sannadihii 1987 -1990 waxaa lagu qabtay magaalooyinka waaweyn sida Muqdisha olole lagu ciribtirayo gudniinka dumarka iyadoo loo adeegsanayo qoraallo iyo qalabka warbaahintaba. In kastoo aan baaritaan lagu samayn natiijadii ka soo baxday ololahaas dagaaIkii sokeeye awgii. Haddana waxaa muuqatay in gudniinka dumarku uu noqday mid waxyeelladiisa laga hadli karo.

Markii ugu horeysay taariikhda ayaa bishii juun 1988 kii waxaa lagu qabtay magaaladda Mugdisho shirweyne caalami ah oo looga dooday dhibaatooyinka gudniinka dumarka. Shirkaas waxaa ka soa baxay talooyin ah in la' cirib tiro gudniinka dumarka nooc kasta ha ahaadee iyo in waddamada looga dhaqmo gudniinka sida Soomaaliya logo fuliyo olole waxbarasho iyo kicin oo lagu baraarujinayo bulshada. Rajaduna waxay ahayd in gudniinka dumarka 50% la dhimo sannadka 2000.

Culumaa'uddiin badani waxay xaqiijiyeen in gudniinka dumarku gaar ahaan nooca fircooniga ah uusan bannaanayn. Qur'aanka kariimka ah oo wax kasta lagu sheegay gaarahaan waxyaalaha dumarka khuseeya sida; "Caadada, Naasnuujinta, Uurka" iwm, haddana ma jirto aayad kaliya oo faraysa gudniinka dumarka.

N*oocyada* gudniinka

Gudniinka dumarka waxaa loo qaybiyaa saddex nooc oo kala ah: Sunna khafiif ah, Sunna iyo qodbidd ama fircooni.

I. Sunnada khafiifka ah (Mild sunna): Noocani waa kan ugu khafiifsan, sababtuna waa sarid ama dhiijin caaradda xubinta dareenka jinsiga (kintirka).

II. Sunna (Clitordectomy): Gudniinka noocan ah waxaa la jarayaa qayb ama dhamaan xubinta dareenka jinsiga iyo qaybaha la xiriira sida bushimaha yar yar.

lll. Fircooniga/ Qodbidd (Infibulation): Noocani waa kan ugu khatarsan uguna dhibaato badan,lagana isticmaalo Soomaaliya.
Waxaana la goynayaa dhammaan xubinta dareenka jinsiga iyo xubnaha la xiriira sida bushimaha ka dibna dhaawaca ayaa la isku tolaa waxaana gabadhii yarayd loo reebaa dalool yar oo loogu talagalay inay soo maraan kaadida iyo caadada.

Soomaaliya, wixii nooca fircooniga ka ahayn waxaa loo yaqaan "Sunno".

Dhibaatooyinka caafimaad ee gudniinka

Dhibaatooyinka gudniinka dumarka waxaa loo kala saaraa kuwo degdeg ah iyo kuwo dambe.

Dhibaatada degdeg ah

1. Xanuun iyo xafaf: Taasoo ay keentay kabaabyo la'aanta xubinta la goynayo (anaesthesia la'aan). Xataa haddii la kabaabyeeyo xubintii, daawadu markay ka baxdo ayaa xanuun oo dhami halkii ka bilaabanayaa. wax yar oo ku gooyey ayaad garan kartaa xanuunkooda maxaad u malaynaysaa xubin jirkaaga ka mid ah oo la jaray.

2. Dhiigbax iyo hurgun: xubinta la jaro waxaa ku yaal xididdo yaryar, haddii la gooyana waxay keeni karaan dhiigbax badan oo dili kara gabadbaada. Waxaa kaloo dhici karta in uu caalir/hurgun gabadba ku dhasbo, caalirkaas oo raagana wuxuu keeni karaa xanuun joogta ah, taasoo mustaqbalka sababi karta in gabadha dhalmo la' aan haleesbo.

3. Iyadoo ay jirto xaalad saxo darro, sida isticmaalka mindiyo aan nadiif ahayn iyo u adeegsiga qalabka dhaqan daaweedka goobta nabarka ah daaweynteeda ayaa keeni karta infekshan khatar ah. Mararka qaarkood muddo yar gudniinka dabadeed waxay isu rogtaa teetano.

4. Celinta kaadida: Waxaa dhacda marka la gudo gabadhu inay isku celiso kaadida. Sababtoo ah kaadidu waxay taabanaysaa dhaawacii taasoo run ahaantii xanuun iyo xafaf badan. Kaadida waxaa ku jira qashin badan oo jirku iska saaro sidaa darteed hakashadaas waxaa ka dhalan kara barar iyo hurgun khatar ah oo weliba xummad leb.

5. Dib u qodbidda: Toddobaadyo ka dib ayaa la eegaa siday isku qabsadeen xubnihii la jarjaray. Haddii ay caddaato in aysan sidii la rabay isu qabsan, waxaa lagu celiyaa gabadha tolliin ama qodbid cusub. Taana waxay u keentaa ilmaha yar naxdin iyo niyad jab hor leh. Waxaa kale oo dhacda in dhaawaca oo horey u bogsan waayaa uu keeni karo hurgun, dhiigyari iyo nafaqo darro.

Naxdin: Dhiigga u soo quIqula sida dhakhsaha leh oo aan iImaha yari filayn wuxuu keenaa naxdin, argagax iyo cabsi xad dhaaf ah.

Dhibaatada dambe ee gudniinka dumarka

Gudniinku wuxuu keenaa dhibaato iyo xanuunno dambe oo fara badan waxaana halkan ku xusi doonnaa qaar ka mid ah:-

1. Xanuunka Caadada: Gabdho fara badan ayaa bil kasta ku xanuunsada dhiigga caadada. Waayo dhiiggu si caadi ah uguma soo bixi karo sababtuna waa daloolka loo reebay oo ah mid aad u yar. Marmarka qaarkoodna waxaa dhacda in dhiiggu ku xinjiroobo gudaha taasoo keeni karta caalir. Waxaana laga yaabaa in caalirkaasu ku fido xubnaha taranka,sida ilmogaleenka,dhuuumaha iyo ugxan sidayaasha,ayna dhici karto in gabadhu mustaqbaIka ay ilmo la'aan ku dhacdo.

2. Caalir/lnfekshan: Waxaa dhaca in haweenka qaar ka mid ah dhabar iyo gumaar xanuun la taahaan taasoo marmar keento infekshan haleelo xubnaha taranka, kelyaha iyo kaadi haysta. Inta badan gudniinka fircooniga ayaa arimahani u sabab ah.

3. Waqtiga guurka: Waxaa dhab ah in markii gabadha guursato ay dhibaato kala kulanto galmada, waayo daloolka xubinta oo aad u yar iyo haaraha ramaIka (Iaastikada) maqaarka oo adag. Gabadhu waxaysan ka fursanaynin laba arrin midkood tan kowaad in ninkeedu furo iyo tan labaad oo ah in loo geeyo takhtar ama ummuliso xubinta jeexda. Mid kasta xanuunkeeda gaarka ah ayey leedahay.

4. Waqtiga foosha: Takhaatiir badan waxay sheegeen in foosha adag ama waqtigeedu dheeraado ay ka timaaddo badanaa gudniinka. Taana waxaa sababay maqaarkii xubinta oo adkaaday,waxaana dhacda marmarka qaarkood in ilmuhu soo bixi waayaan kuna daahaan kafka taasina waxay keeni kartaa in hawo la' aani ilmaha ku dhacdo. Haddii aan hooyada loo helin gargaar deg deg ah waxaa dhici karta in hooyada iyo ilmuhuba wada geeriyoodaan.

5. Raadreebka Nafsaani: Weli cilmi baaris badan laguma samayn waxyeellada gudniinka ee dhinaca dareenka maskaxeed. Laakiin waxaa hubaal ah in gabadha Soomaaliyeed ay la soo dersaan xanuun iyo cabsi la xiriira gudniinka. Tusaale ahaan, gabadha yari aad bay ugu faraxsantahay in la gudo waayo waxay arkaysaa asaaggeed oo la guday. Teeda kale waxay dareemaysaa cabsi iyo welwel badan siiba waqtiga gudniinku soo dhawaado. Midda kale gabadha Soomaaliyeed way ku faraxsantahay inay guursato,carruur dhasho,laakiin iyana

waxaa la soo gudboonaada walaac waqtiga arooska. Waayo waxay aaminsan tahay iskana dhaadhicisay in habeen kaas wax ku dhici doonaan sababtoo ah gabdhaha Soomaaliyeed badanaa guurka ka hor ma helaan warar la xiriira galmada.

Sheeko ku saabsan gudniin gabar Soomaaliyeed

Ruun waa Hooyo Soomaaliyeed oo 32 sano jir ah, waxay ku dhalatay kuna barbaartay magaalo, heerkeeda waxbarasho waa dugsi sare. Ruun waxay leedahay 4 carruur ah: 2 wiil iyo 2 gabdhood. Ruun waxaa la guday iyadoo 7 jir ah. Waxaana lala guday saddex gabdhood oo kale.
Waxaan weydiiyey inay wax iiga sheegto waayo aragnimadii gudniinkeeda waxayna tiri sidatan:

Waan garanayey in maalin maalmaha ka mid ah la'i gudi doono ama xalaalayn doono aad ayaan ugu faraxsanaa uguna riyaaqayey waayo aragnimada igu cusub. Sidaan xusuusto waxaa nala guday goor aroor ah aniga ayaa la ii hormariyey,waayo waan ugu yaraa hooyadayna waxay rabtay in aanan maqlin oohinta gabdhaha kale. Markaan arkay Islaanta wax gudda waan gariiray cabsi awgeed, waxaa kale oo goobta yimid haweenkii deriska ahaa ee hooyo casuntay. Ka dib dharkii ayaa la iga dhigay waxaana naftayda ku
qasbay inaan fariisto. Haweenkii waxay ii qabteen garbaduub,lugahayga waa la kala fogeeyey islaantii waxay bilowday howsheedii gudniinka. Waxaan dareemay xanuun badan oo aan la qiyaasi karin. Kor ayaan u ooyey, hoos ayaan u ooyey waan dagaalamay waxaan isku dayey inaan baxsado, laakiin waxba iima suuro gelin. weli waan xasuustaa hadalkii ay haweenku ku la haayeen islaanta wax guda si wanaagsan u tol, “daloolka yaree." ka dib waxaa dhulka la ii dhigay gogol, waxaana la ii seexiyey dhacdiid.

Hooyaday waxay ii keentay buskud iyo xalwad laakiin waan cuni waayey,sababtoo ah waxaa i hayey xanuun badan. Waxaan dhibaato weyn kala kulmay kaadida,waayo waxaan ka baqayey xanuunka iyo xafafka badan oo dhaawaca daqninaya. Bil ku dhawaad ayaan lugaha ka
dabranaa kuna kutubayey uI aniga oo waliba is dhowraya. Sidaan xasuusto,hooyo waxay u yeertay labo islaamood oo deriska ahaa markay yimaadeen ayaa waxa la eegay sida xubnuhu isu qabsadeen, nasiib darro waxay go' aan ku gaareen inaysan sidii la rabay ahayn, waxaan isla markiiba la goostay in la'igu celiyo qodob labaad. Naxdin, baqdin iyo niyad jab ayaa ila soo deristay, laakiin meel aan uga baxsado ma jirin. Hooyo iyo haweenkii kale waxay igu yiraahdeen gabadh fiican oo bulshadeed ixtiraamto ma' noqonaysid haddaan si wanaagsan laguu qodbin. Sidaas ayaana dib la' iigu qodbay. 10 beri

ka dib ayaa haddana la eegay xubintii nasiib wanaag markaan islaamihii way ku qanceen si aan la koobi karayn ayaana u farxay. Ruun waxaan weydiiyey in gudniinku dhibaato u keenay, waxayna ku jawaabtay sidatan:

Intaanan guursan waxaan aad ugu xanuunsan jiray caadada, waayo dhiiggu igama soo dareeri jirin. Mar ayaan isbitaal galay takhtarkuna wuxuu ii soo jeediyay in la i jeexo laakiin waan ka diiday. Hase ahaatee taasi waan ka ladnaaday intaan guri galay,gaar ahaan intaan carruurta dhalay dabadeed.

Ruun waxaan weydiiyey ra'yiga *ay* ka qabto gudniinka haweenka, waxayna tiri sidatan:

Waxaan u malayn jiray in gudniinka haweenka diin ahaan loo sameeyo. laakiin markii aan ogaaday inaan Qur'aanka kariimka ah lagu
sheegin ayaan go' aansaday in aanan gabdhahayga gudin, xataa sunno,waayo waxaan ogaaday inaan loo baahnayn. Teeda kale ma doonayo in xanuunkii aan soo maray gabdhahayguna maraan.

Sababaha gudniinka

Sababaha gudniinka dumarka waxaa loo cuskadaa dhowr qodob oo ay ka mid yihiin qodobada hoos ku qoran:

1. Dhawrida bikranimada: VVaxaa dad badan rumaysan yihiin in gudniinku dhawro ama ilaaliyo gabadha ilaa ay ka guursato. VVaayo bikrada dhaqan ahaan aad ayaa loo qiimeeyaa. Runahaantii Gudniinka iyo bikrinimadu iskuma xima, waayo iyadoo gabadhu gudantahay oo waliba qodbantahay ayey waxay doonto samayn kartaa ama suuqaba geli kartaa ama dhawrsanaan kartaa.

2. Caado iyo Dhaqan: Dad badan ayaa ayaguna ku dooda in gudniinku yahay caado iyo dhaqan. Gaar ahaan haweenkeena qaarkood waxay halku dheg ka dhigtaan "aniga waa la'i guday,hooyaday iyo ayeydayna hortay ayaa la guday sidaa awgeed aniguna gabadhayda waa gudayaa". "VVaIIee gabadhayda buuryaqab laguma caayo". VVaxaa kale oo hal qabsi laga dhigtay waxyaallo kutirikuteen ah sida "caado la gooyey cara alleey leedahay".

3. Diin: Dad badan ayaa aaminsan in gudniinka loo sameeyo arrin diiniyan ah awgeed,laakiin ma jirto aayad quraan ah ama xaddiis nabi Maxamed nabad iyo naxarlis korkiisa ha ahaatee (NNKHA) ansixiyey oo ah gudniinka dumarka.

4. Nadaafad iyo saxo: VVaxaa la yiraahdaa gabadha gudani waa nadiif,gudniinku waa qurux. Cilmigana waxaa lagu xaqiijiyey inaan arrimahaan waxba ka jirin. VVaxaa qurux iyo nadiif leh sidii ilaahay jirka u sameeyey.

Yaa go' aamiya gudniinka gabdhaha?

Gudniinka gabadha waxaa la xijiyaa in hooyadu mas'uul ka tahay oo iyadu go' aamiso gudniinka gabadha. Laakiin waxaa jirta in Aabuhu ka qayb qaato go' aanka gudniinka gabadhiisa waxaana dhici karta in uu ku raaco ama ku diido hooyada. Waxaa kaloo dhici karin in hooyadu ka soo horjeesato, laakiin Aabuhu ku cadaadiyo in gabadha la gudo. Waxa kaloo jirta in ay Ayeeyo door weyn ka qaadato gudniinka gabadha marmarna waxaana dhacda in ay keligeed go' aan iska gaarto gabadhii yarayd sidaa ku guddo. Sida sheekadaan ka dhacday waddanka Maali. Sheekaduna waa sidaan soo socota:
"Waxaan ahay hooyo saddex gadhood leh. Aniga iyo ninkaygu waxaan go aan ku gaarnay in aannaan gudin gabdhaheena. gabdhaha waxay ku dhasheen dalka Faransiiska,markii aniga iyo ninkayga waxbarashadii noo soo dhammaatay waxaannu ku laabannay Maali. Su' aashii ugu horreeysey ee hooyaday i weydiisay waxay ahayd inaan gabdhaha guday iyo in kale. waxaana ugu jawaabay "Maya" waxaana si cad u iri kuma tala jiro inaan gabdhahayga gudo. Waxay ahayd xilli fasax ah, waxaan helay shaqo carruurtana waxaan ku dhaafi jiray waalidkay waxaana soo dooni jiray maalmaha fasaxa ah ee usbuuca. Maalin ayaan ka soo laabtay shaqadii waxaana soo maray waalidkay iyo carruurtaba si aan u salaamo. waxaan la yaabay gabdhahaygii oo aan arki waayey, waayo way igu soo ordi jireen. Waxaan
weydiiyey hooyaday halkay jiraan waxayna igu tiri qolkaas iyadoo ii tilmaamaysa qolkay seexan jireen. Waan yaabanahay waxaan is iri ma jiifaan mise kuma oga inaaba timid. Qolkii ayaan galay waxaana arkay iyagoo derin ku jiifa marana huwan. Muuqaalka wajigoodu oo bararnaa iyo ilmadii indhahooda buuxisay markaan arkay waan iska ooyey waana iska cabaaday waxaan iri."Maxaa dhacay?". "Maxaa ku dhacay gabdhahaygii?" ka dib waxaa i soo gaaray codkii hooyaday iyadoo leh:"ha iga arbushin gabdhaha saakay ayaa la guday lana qodbayè".

Aragtida Islaamka ee gudniinka dumarka

Gudniinku waa eray ay taariikhdiisu fog tahay loogana dhaqmi jiray dalal kala duwan sida Masaaridii hore,Carabtii hore,iyo waddamo

kale. Hubaal,waxa ay culimada islaamku isku waafaqsan yihiin in gudniinkii ugu horeeyey uu ahaa kii Nebi Ibraahim uu isguday isagoo siddeetan jir ah; intii ka danbeysayna uu gudniinka raggu noqday dhaqan diineed. Wadaaddada qaarkood waxay leeyihiin gudniinka raggu waa sunne maadaama nebigeena Maxammad ah NNKH uu gudnaa. Dhinaca haweenka waxaa ugu horreysay haweeneydii la oran jirey "Haajira" oo ahayd xaaskii yaraa ee Nebi Ibraahim ee dhashay Nebi IsmaaciiI. Sida uu gudniinka haweenku ku yimidna waa sheekadan:

"Haajira waxaa lahaan jirtay Saariya oo ahayd xaaskii weynaa ee Nebi ibraahim. Markii ay Saariya dhali weyday,da'dii lagu dhalayeyna ay ka, gudubtay ayey Nebi Ibraahim kula talisay inuu guursado Haajira si ay ilmo ugu dhasho. Waxa ay Haajira dhashay Nebi Ismaciil. IIaahay amarkii, muddo ka dib ayey Saariyana dhashay Nebi Isxaaq. Labadii wiiIna isku mar ayey hana qaadeen. Maalin maalmaha ka mid ah ayey labadii wiil u soo baratameen dhabtii Aabahood, waxaana soo dheereeyey Nebi Ismaciil. Taasi waxaa aad uga xumaatay Saariya, waxay ku dhaaratay in ay saddex xubnood oo xubnaha Haajira ka mid ah goyso. Markaa Nebi Ibraahim waxa uu ku taliyey
in ay dhegaha ka daIooIiso, xubinta haweenka Wax ku dareemaanna ay cad yar ka goyso,sidaasna ay dhaartii IIaahay ku gudato, Haajirana ay ku nabadgasho." Saariya inay arrintaan fulisay lama caddayn.

Ma Waajib baa Gudniinku mise waa Sunne?
Culimada diinta Islaamku waa ay isku khilaafsan yihiin gudniinka. Aaraa' dooduna waa sidaan soo socota:
-Culimada qaarkood waxa ay qabaan in uu gudniinku yahay waajib sida imaamu shaafici.

-Qaar kale waxay ay qabaan in gudniinku yahay sunno. Sidaa waxaa qaba Abuu Xaniif iyo Maalik. Gaar ahaan mad'habtani waxay qabtaa in gudniinka raggu sunna yahay, kan dumarkanu uu habboonyahay.

-Mad'habta xanaabilada waxay leedahay gudniinka raggu waa waajib kan haweenkani waa wanaag.

Qaar kale oo culimada mucaasiriinta(contemporary)ka mid ahina waxay yirahdeen sidan:
Nin la oran jiray Sheekh Maxammuud Shaltuut oo madax ka ahaan jiray Jaamacadda AlAzhar waxa uu ku sheegay kitaab uu qoray oo la yidhaahdo"Fataawi"inuusan gudniinku waajib ku ahayn haweenka maadaama aan la hayn daliil xaq ah oo waajibinaya gudniinka dumarka. Waxa kale ee uu yiri "Ma banaana in qof bani-Aadan ah la

dhaawaco ama la gooyo jirkiisa haddii aysan maslaxad ka weyni ka dambeyn". Waxaana cad inuu gudniinku dhibaatooyin faro badan oo la xiriira caafimaadka u geysan karo dumarka sida; Dhiigga oo ku xirma marka ay caadadu ku dhacdo iyo xanuun kale oo badan.

Maxay Culimadu daliishanayaan?

Culimada Islaamka ah ee aaminsan in uu
gudniinku yahay waajib, waxa ay cuskanayaan axaadiistan:

1. Xadiiskan oo uu wariyey Abuu Hurayra, Allaha ka raalli noqdee,waxa uu sheegayaa "qofii Islaam ah ha is gudo". Xadiiskani uma kala saarln gudniinka, gudniinka ragga iyo dumarka midna, maxaa yeelay erayga qof waxa uu ku dhacayaa ragga iyo dumarka labadaba.

2. Xadiiskan kale ee uu Abuu Hurayra weriyey,waxa uu caddeynayaa in Nebi Ibrahim NNK uu isguday isagoo siddeetan jir. Gudniinka uu Nebi Ibrahim isguday waa jid sharciyeed oo ay lagama maarmaan tahay in lagu dhaqmo,sida Ilaahay uu ku amray Nebi Maxamed NNK inuu raaco diinta Nebi Ibrahim ee toosnayd. Diinta Nebi Ibrahim waxa ka mid ahaa Gudnünka ragga. "

Culimada kale ee aaminsan sunnaha waxa ay daliishanayaan axaadiistan:

1. Xadiiska uu wariyey Axmed Bin xambal oo caddeynaya in gudniinka raggu yahay sunne,ka haweenkuna habboon yahay.

2. In dad badan ay soo gali jireen Diinta Islaamka waqtigii Nebiga,Rasuulkuna(scw)uusan raadin jirin inay gudan yihiin iyo in kale,waxa uu bari jiray salaadda

Waxaa kaloo jira xaddiis uu wariyey Daxaak ibnu Qays oo sheegaya In Nebi Maxamed(NNKHA) uu kala taliyey haweyneydii gabadhaha gudi jirtay ee la oran jiray Ummu Catiya,kuna yiri "wax yar ka goo haweenka markaad gudayso ee hawada goynin". Taasoo lagu fasiro in nebigu faray haweeneyda in marka ay Wax gudayso aaney wada goyn kintirka,balse ay Wax ka jarto. Culimadu waxay leeyihiin lama hubo in uu Nebiga (NNKHA) sidaa yiri,laakiin kaba dhig inay jirto haddana Rasuulka (NNKHA) ma jiro wax tilmaamaya in uu gudniinka sunnada ah *ansixiyey.* Nebigeena (NNKHA) wuxuu *lahaa* afar gabdhood haddana meel lagu *sheegay* ama *ay* ku *caddahay* ma jiro in gabdhihiisa la *sunneeyey.* Sidaadarteed *ayaa* waddamo muslim ah oo

weliba diinta islaamka ku dheggan sida Sacuudiga aan habayaraatee wax gudniin dumar ah laga isticmaalin.

Sheekh *Sayed* Sabet wuxuu isaguna yiri "Gudniinka dumarku khasab *iyo* waajib toonna ma' aha haddaadan *samayna* wax dembi ah oo kaaga imaan karaa ma jiro, *waayo* Quraanka kariimka ah laguma sheegin,sunnadu ma ansixin ama ma farin. *Wax* aan Qur'aanka lagu sheegin,xaqiiq *cad* oo Nabigu yirina aan loo *lahayn waa* gudniinka dumarka".

Sheekh Dr. Cabdirahmaan *AI-Naggar (AI-Azhar) ee jaamacadda Qaahira wuxuu yiri:*
"waxaan ka *codsanayaa* dhammaan muslimiinta dunida ku nool *inay* ka *joojiyaan* gabdhahooda ficilka *shaydaan* ee gudniinka". Wuxuu kaloo yiri markii la *gudyo* gabadha yar *waxay* ku dhawaaqdaa i dhaaf! i dhaaf! ha i *silicdilyaynin.* Islaamkana silicdilyayntu *waa* ka mamnuuc.

Mowqifka dawlada Nederland ee gudniinka dumarka

Dawladda Netherland way mamnuucday gudniinka dumarka nooc kastaba ha ahaadee. Waa
dembi,Ciddii lagu helana waxay mutaysanayaan ciqaab.

BAAQA HAY'ADDA CAAFIMAADAKA ADDUUNKA"WHO" EE GUDNIINKA DUMARKA

Hay' addani waxay ku dhawaaqday sidatan:

"WHO waxay ku talisay in gudniinka dumarka aan innaba qof takhtar caafimaad ah fulin ama goob caafimaad sida isbitaallagu qaban".

"WHO waxay amartay in nooc kasta oo gudniinka dumarka ah adduunka laga mamnuuco".

Ayagoo fulinaya amarrada iyo talada WHO ayaa Waddamo reer Yurub ahi mamnuuceen gudniinka dumarka, dastuurkoodana ku dareen waxaana waddamadaas ka mid ah Faransiiska, Ingiriiska, Iswiidhan,Zwitzerland iwm. Qofkii lagu helana uu dembi galay xabsina mutaysan karo ha ahaado waalidkii oma qofkii ficilka sameeyey.

Gabagabo

Gudniika dumarka Soomaaliyeed waa caado da'weyn welina ka jirta magaalooyinka,tuulooyinka iyo miyiga dalkeenna hooyo.Dad badan oo
Soomaaliyeed ayaa weli ku dheggan gudniinka oo weliba ku dooda waa caado,waa dhaqan "cultural identity". Aniga aragtidayda gudniinka dumarka lama oran karo waa caado iyo waa dhaqan toonna waayo wax dhibaato sida (xanuun, xafaf, dhiigbax iyo caalirba) keeni kara ma caado iyo dhaqanbaa? Runtii waan leennahay caado iyo dhaqan hodan ah sida suugaanteenna, dharkeenna,cuntadeenna iwm.

Buug yarahani waxaan ku soo xusnay cawaaqibka gudniinka ee gabdhaha Soomaaliyeed iyo in aan gudniinka dumarku wax sal ah habayaraatee ku lahayn Quraanka. Mana jirto xaaddiis sugan oo Nebiga(NNKHA)ansixiyey oo aan ka ahayn kii uu kala taliyey umma catiya oo ahaa "ursii hana ku talax tegin". Si loo yareeyo dhibaatada gudniinka dumarku waa mid u taal qoyska Soomaaliyeed gaar ahaan haweenku waa inay door weyn ka qaataan ciribtirkiisa maadaama iyagu ay yihiin dhibbanayaashii.

Gunta hadalku wao "ANNAGU KAMA GAARNO EE AANNU KA BADBAADINO GABDHAHEENA".